

## Nagu Caawi in aan Si Wanaagsan u Baranno Bukaannadeenna

Su'aalaha ku saabsan Ururinta Warka ku saabsan Jinsiyadda iyo Haybta Bukaanka



### Maxay tahay sababta su'aalahaan la isu weydiinayo?

Waxaan hadda bukaannadeenna oo dhan ka ururineynaa warka ku saabsan jinsiyadda iyo haybta si ay nooga caawiso in aan iyaga si wanaagsan u baranno. Waxaan markaas si wanaagsan u gudan karaynaa wax ka qabashada baahiyaha bulshooyinka aan u adeegno haddii aan wax badan ka naqaanno bukaannadeenna, dhaqankooda iyo luqaddoodaba. Warkaan waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya si loo xaqiijiyo in bukaannada oo dhan ay u helaan daryeelka ugu wanaagsan ee ku habboon.

### Maxay tahay sababta su'aalahaan la ii weydiinayo?

Waxaan warkaan ka ururineynaa bukaannadeenna oo dhan. Tani waxay naga caawineysaa inaan aragno kala duwanaanta ku jirta caafimaadka dadyowga kala duwan. Waxaan kala duwanaantaas hoos ugu dhigi karaynaa annagoo xaqiijineyna in bukaannada oo dhan ay helaan daryeel isku tayo ah.


### Miyaa su'aalaha la isku weydiyaa isbitaallada kale?

Waxaa jira xeerar cusub ee gobolka oo isbitaallada ku yaalla Massachusetts oo dhan uga baahanaya in ay soo ururiyaan warkaan. Waxaan warkaan u ururineynaa isagoo qayb ka ah isku day kor loogu qaadayo caafimaadka dhammaan dadka ku nool gobolka.



### Sidee ayey jinsiyaddayda iyo haybtaydu ula xiriiraan caafimaadkayga?

Daraasado ayaa muujinaya in ay kala duwanaa ka jirto caafimaadka kooxo jinsiyad iyo hayb kala duwan. Ma garanayno waxa sababay kala duwanaantaan waxaanna dooneynaa in aan wax badan ka baranno. Waxaan ka shaqayn karnaa in aan kala duwanaantaan ku baabi' inno annagoo xaqiijineyna in dadka oo dhan ay helaan daryeel tayo wanaagsan oo isku mid ah.



### Sidee ayaa warkaan loo isticmaali doonaa?

Waxaan warka jinsiyadda iyo haybta aan bukaannada ka soo ururinno u isticmaali doonaa si aan u aragno haddii ay kala duwanaa ka dhex jirto caafimaadka kooxo dad ah oo kala duwan. Tani waxay naga caawin doontaa inaan xaqiijinno in aan dadka oo dhan siinno daryeel isku tayo ah. Waxaan sidoo kale warkaan u isticmaali doonaa in aan fahamno baahiyaha dadyowga aan u adeegno iyo in aan ku xaqiijinno in dadku ay helaan daryeel dhaq ahaan ku habboon. Hadafkeennu waa in aan wax ka qabanno baahida bukaannada aan u adeegno oo dhan. Waxaan hadafkaan kula kulmi karnaa annagoo bixineyna adeegyo turjumid afka ah, ku deeqeyna warka bukaanka oo loo turjumay luqado kala duwan, iyo annagoo xaqiijineyna in shaqaalaheennu ay bixiyaan daryeel dhaqan ahaan u habboon.

### Ka warran haddii aanan dooneyn in aan warkaan dadka la wadaago?

Waa go'aan adiga kuu yaal haddii aad dooneysid in aad warkaan dadka la wadaagtid. Warkaan waxaa loo ururinayaa oo keliya in uu naga caawiyo in bukaannada aan u adeegno aan si fiican u baranno mana saameynayo daryeelka ama adeegyada aad heshid.



Waxaan kor u qaadaynaa caafimaadka dadka oo DHAN

